City of Rochester, Minnesota.
Su'aalaha sida badan la is waydiiyo ee
Shuruudaha xilliyeedka dhigashada gawaarida

Seasonal Parking Requirements
CITYWIDE • 10/1 - 5/1

Shuruudaha xilliyeedka dhigashada gawaarida.

1. Waa maxaay Shuruudaha xilliyeedka dhigashada gawaarida?
   16ka bisha September 2019 Golaha Degaanku waxa uu qaatay shuruudaha xilliyeedka dhigashada gawaarida (Rochester Code of Ordinances Section 11-6-49). Qaanuunkan waxa uu meelmarinaya shuruudaha aagaga kale ee gawaarida la dhigan karo ee wadooyinka magaalada, iyo qaybaha goobada ee ay wadooyinku ku dhamaadaan laga bilaabo 1da Oktoobar ilaa 1da Meey.

2. Waa maxay dhinaca kale ee gaadhiga la dhigan karo?
   Waxaa loola jeedaa dhinaca kale ee gaadhiga la dhigan karo, inta badan wadooyinka magaalada ayaa la ogolaan doonaa in aad gaadhida dhigato dhinac keliya inta u dhaxaysa 2da aroornimo ilaa 3da galabnimo maalin walba. Tani waxa ay isu bedeli doontaa iyadii oo loo eegayo maalintaa iyo bisha, si kolkaa fursad loogu helo si loo baneeyo wadooyinka Rochester xilliga barafku suuragal yahay.

3. Sababta loo meel marinayo aagaga kale ee dhinacyada gawaarida la dhigto?
   Meel marinta qaanuunkan aagaga kale ee dhinacyada gawaarida la dhigto waxa ay fududeeyn doontaa xaaqida barafka wadooyinka magaalada. Tan ugu muhiimsan, waxa ay fursad wanaagsan u siin doontaa in ay howshooda gutaan gawaarida xaaladaha degdega ah sida dab demiska iyo kuwa caafimaadka, ujeedadu waa in ay si sahlan u gaari karaan bukaanka ama halkii ay kol waliba xaalad degdeg ahi ka jirto. Sidoo kale, xaaqida barafka oo meel mar noqota in ay ka dhigi doonto wadooyinka magaalada ammaan oo cid waliba si sahlan u adeegsan karto, gaadh ahaan gawaarida waawayn sida basaska, kuwa xamuulka iyo kuwa qashinka gura.

4. Kolkii hore dhibaato ma jirtay?
   Wadooyinku waxa ay ahaayeen ciriiri kolka oo uu baraf badani da'o, sababta iyadii oo aysan suuragal ahayn in la nadiifiyo wadooyinka min dhinac ilaa dhinaca kale, xaafadaha qaar aad bay ciriiri u yihiin bilowga iyo dhamaadka xilliga qaboobaha, waana ay ku adag tahay xataa kolka lagu daro gawaarida yaryarka ah in ay adeegsadaan haddii aan fursad loo helin in si dhan looga baneeyo barafka. Amniga guud ayaa kol walba xaalad qatar ah ku jiray maadaama aysan suuragal ahayn in ay fursad u helaan adeegsiga wadadaa barafka yaalo, gawaarida ciidamada amniga, kuwa xaaladaha degdega ah ee caafimaadka (ambalaaska) iyo dab demiska.

5. Maxaa loo bilaabaa dhinacyada kale duwan gawaarida la dhigto 1da bisha October?
   Geeduhu caleenta ayeey tuuri doonaan Oktoober, shuuruudaha gaari dhigashada wadooyinka oo meel mar noqda waxa ay fursad wanaagsan siin doontaa dariiq nadiifiyaha. Iyadii oo si wanagasan loo nadiifiyo wadooyinkaa ayaa yarayn doonta in ay caleentu xirto biyo mareenada, oo sababi karta in ay daadad rogaan magaalada iyo ka ilaaleeynta tubta ay biyuhu qaadaan oo sumowda. Kolka lagu daro barafka oo qudhiisa ay suuragal tahay in uu bishan oktoobar soo daato, intuba waxa ay u fududaynayaan howlwadeenada taa in ay nadiifiyaan wadooyinka min dhinac ilaa dhinaca kale.

6. Maxay u jirayaan Shuruudaha gaari dhigashada ilaa 1da Meey?
   Xaaladaha degdega ah ee barafku waa caadi in ay xilli dambe gaadhaan halka ay xaaqida iyo gurida barafku si joogta ah u sii jiri doonaan inta uu barafku jiro, sida awgeed waa lagama maarmaan in shuruudaha aagaga kale ee dhinacyada gawaarida la dhigto ay sii jiraan. Xataa iyadii oo uusan jirin baraf, shuruudahaa waxa ay u fududeyn doonaan dariiq xaaqaha gurida carada iyo qashinkii kale ee barafku watay xilligii qaboobaha.

7. Waqtigee ayuu meel mar noqonayaa shuruudaha gaari dhigashada? Ma dhigan karaa gaariga labada dhinac ee wadada marka laga reebo waqtiyadaa la xadiday?
   Shuruudaha aagaga kale ee gaari dhigashada waxa ay meel mar noqonaysaa inta u dhexaysa 2da aroornimo iyo 3da galabnimo maalin walba, iyadii oo laguu ogol yahay in aad dhigato gaarigaaga goobahaa la tilmaamay

gelinka dambe iyo habeenkii, waxaase lagama maarmaan ah in aad ilaaliso shuuradahaa oo aadan dhigan inta u dhaxaysa 2da aroornimo ilaa 3 galabnimo.

8. Shuruudahaa ma jiri doonaan maalmaha ciidaha/feestada, sabtida iyo Aaxada?
   Haa, Qaanuunkani waa uu taagnaan doonaa maalin walba kolka lagu daro Ciidaha, Sabtida iyo Axada.

9. Sidee ku garanayaa labada dhinac ee wadada kan kisiga ah ama dhabanka?
   Kan dhabanka ah waa wadada numbarada cinwaanadeedu ku dhamaanaya tirada (0, 2, 4, 6, 8, iwm Tusaale; 122 Apple Drive iyo 2000 Plum Street). Halka kan kisiga ahi uu ku dhamanaayo cinwaanka (1, 3, 5, 7, 9; 401 Maple Avenue iyo 5009 Jefferson Lane).

10. Ma dhigan karaa gaariga dhinac keliya laba maalmood oo is xiga?
    Bilaha qaar waxa ay u dhamaadaan 31 maalmood, sidaa kolka loo eego waxaad dhinac keliya dhigaysaa gaarigaaga dhanka kisiga ah laba maalmood oo is xiga. Sida ay isu xigaan maalmaha kisiga ah iyo dhinaca kisiga ah ee wadadu waa sidan:
    - Oktoober 31 iyo Nofember 1
    - Desember 31 iyo Januwary 1
    - Januwary 31 iyo Februwary 1
    - Februwary 29 iyo March 1
    - March 31 iyo Abril 1

11. Ma dhigan karaa dhanka goobada halka ay wadadu ku dhamaato?
    Goobada halka ay wadadu ku dhamaato waa ay adag tahay in la xaaqo, maadaama ay ku yar tahay gaadhi wayn sida kan barafka xaaqa oo kale ah, sidaa awgeed darawalada waxaa lagu dhiri gelinayaa kol walba oo ay suuragal tahay in ay dhigtaan gawaaridooda meel ka baxsan goobadaa. Gawaarida la dhigayo goobada halka ay wadadu ku dhamaato waa in ay raacaan shuruudaha aagaga kale ee gaadhi dhigashada laga bilaabo 1da Oktoober ilaa 1da Meey.

12. Shuruudahani ma quseeyaan aagaga mitirada leh ee gawaarida la dhigto?
    Maya, Shuruudahani ma quseeyaan aagaga mitirada leh ee gawaarida la dhigto. Waa in la raacaa calaamada lagu dhejiyay halka gawaarida la dhigayo.

13. Maxaa dhacaya haddii wadadeeyda hal dhinac keliya la dhigan karo?
    Shuruudahani ma quseeyaan wado dhinac keliya la dhigan karo; gawaarida waxaa la dhigi karaa oo keliya wadooyinka la ogol yahay in la dhigto, iyadoo aan loo eegaynin maalinta iyo bisha toona. Waxaa dhici karta in si dhow loola socdo kolka gaari dhigasho ku meel gaar ah lagu dhigo goobahaas, si kolkaa aagagaas ay ugu suuroowdo in la xaaqo.

14. Maxaa dhacaya haddii aan wadadeeyda marnaba la ogoloyn in la dhigto?
    Waa in aan la dhigan haddii aan wadada la ogolayn in la dhigto gawaari.

15. Ma ku qasbanahay in aan shuruudahaa raaco haddii aan haysto ogolaasha gaadhi dhigashada Degaanka?
    Haa, shuurudaha aagaaga kale ee gaari dhigashada waa qasab in aad u hogaansanto xataa haddii aad haysato ogolaasha gaari dhigashada degaanka, tan waxa loo qaabeeyey qorshaynta aagaga gaari dhigashada deegaanka, baahida iyo faa'iidada aagaga kale ee gaari dhigashada waa la mid tan aad ogolaashaha u haysto.

16. Qanuunka gaari dhigashadu ma meel marbaa xataa haddii uusan jirin baraf la sheegay ama da'ay?
    Qaanuunkan waxa uu meel mar yahay laga bilaabo 1da Oktoober ilaa 1da Meey, iyada oo aan loo eegin baraf la sheegay ama da'ay oo dhulka yaala.

17. Sideen u wargeliyaa qolyaha ay quseyso gaadhi si qalad ah loo dhigay aagagaa la xusay?
    Waxa aad ku wargelin kartaa gaari si qaldan loo dhigay aagagaa la xusay qolyaha amniga ee xaaladaha aan degdega ahayn, fadlan wac 507 - 328 -6800.

18. Qaanuunkan ma quseeyaa aagaga sida gaarka ah loo leeyahay ee aysan xaaqin magaaladu?
    Qanuunkani waxa uu quseeyaa oo keliya aagaga ay magaaladu maamusho. Ma quseyso aagaga sida gaadhka ah loo leeyahay, ama jidadka degmada, iyo gobolka leeyahay.

Tigidhada, Ganaaxa iyo Qaadida Gaariga

19. Imisa weeye ganaaxu?
    Ganaaxa la xidhiidha shuruudaha aagaga kale ee dhigashadu waa $25 sanadkan 2019 iyo 2020. Macluumaad dheeri ah oo la xidhiidha inta uu dhan yahay ganaaxa sanadaha soo socda eeg “The official City of Rochester Fee Schedule.”

20. Maxaa sababay in uusan askarigu iga dayn karin tigidhka kol haddii aan imid isagii oo qoraya?
    Haddii uu askarigu qoro tigidh, waa ay muuqataa in aadan waqtigii la doonayey in laga qaado gaarigaa goobta aadan qaadin, askarigu kaama dayn karo tigidhka, waayo kolka ay qoraan waa la waydiinayaa tigidh walba oo ay qoreen. Haddii tigidh lagu siiyey, fadlan ka qaad gaadhigaaga halkaa si aan loo qaadin.

21. Maxaa tigidh la ii siiyey ama loo qoray gaadhigayga kadib kolkii wadada la xaaqay?
    Qaanuunkaa waa meel mar iyadoo aan loo eegaynin haddii wadada la xaaqay iyo haddii aan la xaaqin.

22. Xaggee u doontaa gaadhigayga kolka la qaado/jiido kadib?
    La xidhiidha khadka aan xaaladaha degdega ahayn 507 - 328 - 6800, iyagaa kuu sheegi doona wixii macluumaad ah ee la xidhiidha gaadhigaaga, waxa lagaa doonayaa in aad taqaano numbarka gaadhigaaga.

Xaaladaha Degdega ah ee Barafka

23. Maxay tani kaga duwan tahay xaaladaha degdega ah ee barafka?
    Xaaladaha degdega ah ee barafka waxaa lagu dhawaaqi doonaa kolka la sheego in ay jirto xaalad degdeg ah tan la xidhiidha xaaqida barafka, dhaqdhaqaaqa gawaarida xaaladaha degdega ah, basaska, iyo tan guud. Xaaladaha degdeg ah ee barafka sida badan waxaa lagu dhawaaqaa shuruudo dheeri ah oo la xidhiidha aagaga gaadhi dhigashada iyo koobida xilligii la sugi jiray qaadida gawaaridii la dhigay goobo khalad ah.

24. Sidee ku garanayaa in ay jirto xaalad baraf oo degdeg ah?
    Dhowr siyaabo ayaa lagu gaadhsiiyaa dadwaynaha xaaladaha degdega ah ee barafka, sida warbaahinta maxaliga ah, rochestermn.gov, baraha bulshada, iyo Rochester Alerts. Iska diiwaan geli Rochester Alerts (https://alerts.rochestermn.gov/) waxaa laguu soo diri doonaa fariin (Email, ama qoraal) kolka lagu dhawaaqo xaalad degdeg ah.